

Warbixin Isticmaalka iyo Badqabka Mobile Hotspot

Hadii aad degmada ka guurayso, fadlan dugsiga kala soo xidhiidh emailkan laptops@seattleschools.org, ama soo wac 206-252-0100 si laguugu sameeyo balan wakhtiga aad soo celinayso.

Dugsigaaga ayaa kuu sheegidoona wakhtiga lagaa rabo inaad soo celiso agabkan, marka uu sanad dugsiyeedku dhamaado.

Wixii su'aalo ah ee ku saabsan, Samayn, Lumid ama Xadid agab, fadlan soo wac: 206-252-0100

Agabka internetka gacanta ee Mobile Hotspots

Dugsiyada Dadwaynaha Seattle waxay ardayda siinayaan Mobile hotspot ay u isticmaali karaan internetka iyagoo isticmaalaya shirkadaha kala duwan ee bixiya telefonka gacanta.

Warbixintan lagu siiyey waxay tilmaan u tahay:

- Masuuliyada ardayga iyo ilaalinta agabka
- Digniinaha waalidka uu ardaygiisu isticmaalayo hotspotka Dugsiyada Dadwaynaha Seattle
- Badqabka onlineka

Masuuliyada Ardayga

Ardayga hotspotska u isticmaalaya laptop/iPad, internet iyo barnaamijyada kale waa inuu u hogaansamaa xeerarka loo dejiyey ee ku xusan warqada Heshiiska Isticmaalka Shabakada. Ardaygu waa inuu hotspotka u isticmaalaa shaqooyinka dugsiga oo kaliya. Muga oo xadidan awgeed, hadii wax dheeraada loo isticmaalo waxaa dhicikarta inuu hoos u dhaco tayada ama adeegu lumo.

Ilaalinta Agabka

- Waa in aanad isticmaalin hotspotka marka uu dabku buuxsamayo.
- Cuntada iyo cabitaanka ka fogee hotspotska.
- Ka taxadir marka aad galinayso xadhiga dabka iyo agabyada kale ee wax lagu kaydiyo si aad uga ilaaliso inuu hotspotku xumaado.
- Hotspotska waa in la dhigaa meel qabow, marawaxada hawadana fadlan ka ilaali wax xanniba.
- Hadii uu jabo, fadlan soo wac: 206-252-0100 ama email usoo dir: laptops@seattleschools.org

Shaandhaynta Shabakada/Shabakad Gaar loo leeyahay (VPN)

- Laptopska Dugsiyada Dadwaynaha degmada Seattle waxaa loo habeeyey in ay markasta isticmaalaan aalada shabakada gaarka loo leeyahay ee VPN. Aalada VPN waxay ku xidhaa shabakada Dugsiyada Dadwaynaha Seattle, xataa marka lagu isticmaalayo guriga ama xarumaha bulshada.
- Shaandhaynta shabakadu waxay isku daydaa in ay shaandhayso oo ay is hortaagto wixii xun markaad internetka wax ka baadhayso, mase joojiso wixii aan haboonayn oo dhan.
- Waa in uu qof wayni kormeeraa marka hotspotka ardaydu isticmaalayso, hadii aad wax ka shakidana aad la wadaagtaa Dugsiyada Dadwaynaha Seattle.

Hadidaada Internetka/Amniga Internetka/Xogta shakhsiga ah

- Waalidku waa inay soo ogaysiiyaan Dugsiyada Dadwaynaha Seattle hadii ay ka shakiyaan in ardaygoda online loogu hanjabay ama lagu hadiday.
- Waalidku waa in ay ardayda xasuusiyaan:
 - In aanay qof aanay garanay kula sheekaysan internetka.
 - Waligaa wax adiga kuu gaara ha ku qorin internetka, sida magacaaga, adarayskaaga, dugsigaaga, iwl.
 - Ha ogolaanin in aad la kulanto qof aad onlineka ku baratay.
 - Marna sawiro adiga ama arday kale ah internetka ha galin.

Khayraad Dheeraada

- Khayraad ku saabsan badqabka onlineka: <https://staysafeonline.org/>
- Jooji Handidaada StopBullying: <https://www.stopbullying.gov/>
- Ilaali Ammaanka ubadka onlineka: <https://www.us-cert.gov/ncas/tips/ST05-002>